Xubnaha Qaaliga ahow,

Waad ku mahadsantahay inaad qayb ka noqoto qoyska daryeelka caafimaadka Molina. Waxa aanu aaminsanahay in qof kastaa uu dareemo dareen wanaagsan, taasina waa sababta aanu u bixino gunooyinka fududeeya caafimaadka wanaagsan.

Wargelintan Sanadkii waxa uu kaa caawin doonaa inaad ogaato macluumaadka gunooyinkaaga Molina Apple Health (Medicaid), iyo barnaamijyada iyo adeegyada aad ku heli karto bilaash. Waxa aanu doonaynaa in aanu xaqiijino inaad ogaato sida aad u heleyso daryeelka aad u baahan tahay caafimaadkaaga jidh iyo habdhaqanka (maskaxda iyo balwadaha) aad u baahan tahay.

Xubin ahaan Molina, waxa aad qayb ka tahay kamid ah caymisyada Apple Health ee ugu qiimaha badan gobolka, oo lagu qiimeeyay 5 xidigood 4, Qiimaunta Caymiska Caafimaadka Medicaid ee NCQA* ee 2021!

## Waxa ugu tiirsanaan kartaa Molina inay daryeesho qoyskaaga oo dhan!

**Daryeelka khabiirka** oo leh dhakhaatiir xirfadlayaal ah si aad u dareento badqab maskaxeed iyo jidheed.

**Maamulida daryeelka** si ay uga taageerto xubnaha qaba xanuunada mudada dheer ah ee u baahan kaalmo dheeraad ah.

**Adeegyada autism** ee caruurta iyo dadka waawayn ee khalkhalka autism.

**Adeegyada mushkilada** waxaa loo heli karaa si ay u caawiso qofka habdhaqankiisu naftiisa iyo dadka kale khatarta geliyo.

Lambarada Mushkilada ee Deegaanka

Khadka Kaalmada Kasoo Kabashada Washington

Wixii ah gurmadyada, soo wac 911.

**Adeegyada kahortaga** ai ay kaaga caawiyaan inaad badqabto iyada oo laguu samaynayo shaybaadho muhiim ah, daryeelka uurka, booqashooyinka daryeelka badqabka, iyo waxkale oo badan.

**Daryeelka caafimaadka maskaxda** ee warwarka, isku buuqa, iyo dareenka guud ee badqabka.

**Daawaynta balwadaha** waxaa kamid ah daryeelka bukaan jiifka iyo bukaan socodka, maamulida xaraarada (detoxification) iyo taageerada lodka.

**Waxbarashada, barnaamijyada iyo adeegyada caafimaadka** si ay u caawiso joojinta sigaarka, maamulida miisaanka iyo waxkale oo badan.

**Khadka Talada Kaaliyaha Caafimaadka 24-saacadood** ee talooyinka caafimaadka u qalma wakhti kasta maalintii.



MOLINA HEALTHCARE
Your Extended Family.

## Molina waxay ku siisaa faa'iidada ***dheeraad*** ah. Wixii ah ***nabada*** niyada ee dheeraadka ah. Waa kuu bilaash.

**Daryeelka muuqaalka iyo muuqaalka ah** – Marka aad u baahan tahay daryeel degdega ah oo aanad ka heleynin xafiiska bixiyaha, waxa aad weli la hadli kartaa ama fiidyaw kala hadli kartaa dhakhtarka shahaadada ka haysta gudida 24/7 kala hadal Teladoc!

(844) 870-6821, TTY/TDD: 711

**Barnaamijka Kaalmada Taleefanka** – Hadii aad u baahan tahay taleefanka gacanta iyo internetka datada oo bilaa xadid ah, waanu ku caawin karnaa! Xubnaha u qalma waxa ay heli karaan taleefanka u gaarka ah Molina iyo qorshaha adeega.

- **Taleefan** Android™ oo BILAASH ah
- **Internet Data** Bilaa Xadi oo BILAASH ah
- **Hadal** Bilaa Xadi ah oo BILAASH ah
- **Fariimo** Bilaa Xadi ah oo BILAASH ah
- **Taleefan** Dibada ah oo BILAASH ah**

*Gunadan waxaa loogu talo geley xubnaha u qalma gunooyinka FCC's Lifeline and Affordable Connectivity Program (ACP).*

*Molina waxaa waxay is kaashadaan TruConnect ee barnaamijkan kaalmada..*

***Dooro dalalka*

**Ka leh caawimo** – Qofna maama inuu maro caqabada nolosha kaligii. Waana taas sababta aanu u siino xubinta Pyx Health app. Waxa aad maal kasta ku dareentaa dareen wanaagsan naxariista iyo kaftanka taageerada teknooloojiyada iyo shaqaalaha leh naxariista. Booqo MolinaHealthcare.com/memberwa.

**Daawaynta balwahada obiyoodh iyada oo sir ah gurigaaga** - Si looguugu fududeeyo inaad hesho daryeelkan muhiimka ah, waxa aanu bixinaa latalin onleyn ah iyo daawaynta ee bixiyayaasha khabiirada ah iyada oo aan la qaban xarunta caafimaadka

**App-kay taleefanka Molina** - Soo dejiso app-keena taleefanka oo macluumaadkaaga caafimaadku waxa uu kuugu jiraa gacantaada. Si fudud u hel bixiyayaal cusub, eeg kaadhkaaga aqoonsiga, akhri qorshahaaga daawaynta iyo waxkale oo badan!

Kasoo dejiso app-ka App Store ama Google Play.

Lagu heli karo Ingiriisi iyo Isbaanish.

## Barnaamijka Abaalmarinta Xubinta Molina

**Abaalmarinta Xubinta***** Hel Kaadhadhka Hadyada Amazon.com si aad u doorato caafimaad sida inaad hesho shaybaadhka badqabka, daryeelka uurka, maamulida macaanka iyo waxkale oo badan.

**Abaalmarinta Talaalka COVID-19**** (Mudo Gaaban Ayaa La Bixinayaa)** Hel $100 oo ah Kaadh Hadyada ah oo Amazon.com marka aad qaadato talaalka KOWAAD ee talaalka COVID-19 inta u dhaxaysa Juun 1, 2022 iyo Diseember 31, 2022. Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato booqo MolinaHealthcare.com/WA-Medicaid-Wellness.

Si aad u hesho goobo talaal oo kugu dhaw, booqo vaccinelocator.doh.wa.gov.

(Talaalka kaliya ee Johnson & Johnson's Janssen waxaa loo arkaa inuu yahay dhamaystir kadib marka la qaato ka kowaad ee kaliya.)

*Abaal marinta caafimaadku way isbeddeli kartaa ogaysiis la'aan. Dalab xadidan, ee amazon.com/gc-legal.*

## Aan ku xidhnaano!

Sida xubinta Apple Health, mid ka mid ah sheeyada ugu muhiimsan ee aad samayn karto inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xidhiidhka. Waxay caawisaa xaqiijinta inaad awoodo helida daryeelka aad u baahan tahay, marka aad u baahan tahay. Waxay kuu oggolaataa adiga inaad hesho wararkii u dambeeyay iyo xusuusinta naga timid anaga.



Macluumaadkaaga xidhiidhka waxaa ku jira:

- Lambarka telefoonka
- Cinwaanka Iimaylka
- Cinwaanka boostada:

Ku cusboonaysii macluumaadkaaga xidhiidhka labbada ururada caafimaadka ah oo muhiim ah oo u baahan doonto inay adiga kula soo xidhiidhaan.

1. Molina Healthcare
    - Ka soo wac Xubinta Adeegyada (800) 869-7165, TTY/TDD: 711 si loo cusboonaysiiyo macluumaadkaaga caafimaadka ay ku jiraan cinwaankaaga boostadda, ama booqo MyMolina.com
    - Cusboonaysii lambarkaaga telefoonka iyo iimaylka keliya abka moobilka My Molina
2. Washington Healthplanfinder
    - Soo wac (855) 923-4633 (TTY: 855-627-9602), ama booqo wahealthplanfinder.org si loo cusboonaysiiyo dhammaan macluumaadkaaga xidhiidhka

## Baro wax badan oo ku saabsan Barnaamijka Horumarkayaga Tayada (QI)

Barnaamijka Molina's QI si firfircoon waxa uu u xaqiijiyaa in xubnahayaga iyo adeeg bixiyayaasha ay leedahay ilaha, qalabyada iyo macluumaadka si loo taageero natiijooyinka caafimaadka la horumariyay ee xubinta.

Barnaamijka QI:

- Waxay hubisaa inaad hesho kooxda caafimaadka loo qalmo
- Qiimaynahaaga iyo qaadista tallaalabada haddii ay jirto arrinta tayada daryeelka lagu siiyay adiga
- Ku jawaabaa oo ka hadlaan baahiyaha kala duwan dhaqan ahaan iyo luqad ahaan xubnahayaga
- Waxay sare u qaadaa badbaadada daryeelka caafimaadka dhexda waxbarashadda ee xubnahayaga iyo adeeg bixiyayaasha
- Qiimayta tayada daryeelka caafimaadka dhexda HEDIS® qiyaasaha
- Ka warhaysaa qanaca xubnaha dhexda CAHPS® xog ururinta
- Waxay bixiyaan waxbarashadda caafimaadka iyo ilaha xubnaha sida:
    - Hagaha Helida Daryeelka Caafimaadka tayada. Tusida xubnaha sida loo gaadho dheefaha, barnaamijyada iyo adeegyada .
    - Hagaha Korida iyo Ku joogida Caafimaadka. Sharaxdaa waxa ay yihiin adeegyada loo baahan yahay iyo goorta la dhammaystirayo.

- Jidka Hagaha Fayo Qabka. Waxa uu bixiyaa khariidada booqashooyinka daryeelka caafimaadka leh ee carruurta iyo dadka waa wayn.
- Joogida Tilmaamaha Caafimaadka leh. Wadaago macluumad caawimo badan oo ku saabsan maaraynta xaaladaha raaga.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad barato wax ku saabsan barnaamijka Molina Q, booqo MolinaHealthcare.com/WAQIProgram.

**Su'aalaha?** Booqo MolinaHealthcare.com ama wac Xubinta Adeegyada lambarka (800) 869-7165, TTY/TDD: 711.

Si lagaaga caawiyo inaad nala hadasho, Molina waxay bixisaa adeegyada turjubaanka ay ku jiraan qoraal waa wayn, qoraalada qoran ee loo turjumay luqadaada, maqalka, qaababka gelida ee korontada ah, iyo Braille.

**Halkan waxaa ah macluumaadka ku saabsan sida loo gaadho daryeelka caafimaadkaaga jidhka iyo dhaqanka.**

### 1. Soo wac PCP gaaga iyo Adeeg bixiyaha Caafimaadka Dhaqanka

PCP waxay u taagan tahay Primary Care Provider (Adeeg bixiyaha Daryeelka Koowaad). Isaga ama iyaddu waa adeeg bixiyahaaga gaarka ah. PCP gaagu waxa uu dawayn doonaa badanka baahiyaha daryeelka caafimaadka caadiga ah, dib u eegaa baadhitaanadaada iyo natiijooyinka, qoraa dawooyinka, oo kuu gudbiyaa adeeg bixiyayaasha kale (khabiirada), haddii loo baahdo.

Bixiyahaaga caafimaadka habdhaqan ahaaneed ayaa daryeeli doona caafimaadkaaga gaarka ah ee maskaxda iyo/ama baahiyaha daaweynta daroogada iyo khamrida.

Waxaad waydiisan kartaa adeeg bixiyayaasha haddii ay bixiyaan caafimaadka lagu bixiyo telefoonka (daryeelka telefoonka guudkiisa). Molina waxay dabooshaa adeegyada caafimaadka lagu bixiyo telefoonka haddii ay adeeg bixiyayaashaadu bixiyaan.

Haddii aanad haysan adeeg bixiye ama aad u baahan tahay inaad beddesho booqashada PCP gaaga MolinaHealthcare.com/ProviderSearch ama soo wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165, TTY/TDD: 711.

Haddii aadu baahan tahay inaad hesho farmasii kuu dhow adiga booqo: Caremark.com/wps/myportal/PHARMACY_LOCATOR_FAST. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dawo qorida, soo wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165, TTY/TDD: 711.

Haddii aad la kullanto dhibta caafimaadka maskaxda soo wac laynkaaga dhibta maxaliga, ama booqo MolinaHealthcare.com/IMC-Crisis. Wixii ah gurmadyada, soo wac 911.

### 2. La hadal Wakiilka Molina

Wakiiladayada Xubinta Adeega waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan qorshahayaga ama daboolida dawada, waxa uu ku siiyaa macluumaadka caafimaadka, kaa caawiyaa inaad hesho adeeg bixiyaha iyo wax badan oo kale.

**Xubinta Adeegyada: (800) 869-7165, TTY/TDD: 711, Isniinta ilaa Jimacaha laga bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 6:30 fiidnimo. (PT).**

Haddii aad wacdo saacadaha ganacsiga, waxaad ka tegi kartaa fariin oo dib ayaan kuu soo waci doonaa maalinta ganacsiga xigta.

Si loo waydiiyo su'aalo ku saabsan u qalmidaada Apple Health ama in la helo caawimada cusboobaysiinta xidhiidhka daboolidaada caafimaadka

- Gobolka Washington Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka Adeegooda Macmiilka lambarka: (800) 562-3022, TRS 711
- Washington Healthplanfinder lambarka (855) 923-4633, TTY/TDD: 711 ama booqo wahealthplanfinder.org

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan gaar ahaan dheefaha xubinta Molina la xidhiidha, fadlan soo wac Molina Xarunteeda Wacyi gelinta (800) 294-8620, TTY/TDD: 711.

Baro wax badan oo ku saabsan dheefahaaga bogga MolinaHealthcare.com.

### 3. Akhri Dhokumentiga muhiimka ah

Akhri Notice of Privacy Practices si loo fahmo sida Molina u ilaaliso gaar ahaanshahaaga.

Ka akhri Buug yaraha Xubinta bogga MolinaHealthcare.com/IMCHandbook si aad u fahanto dheefahaaga iyo sida loo helo daryeel.

In la codsado dhokumentigan ama macluumaadka xubinta Molina oo ku qoran luqad kale, oo qaab kale ah, ama in la helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dheefahaaga wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165, TTY/TDD: 711.

**Buug yarahaaga Xubinta waxa uu kuu sheegaa wax ku saabsan**

- Dheefaha la daboolo iyo kuwa aan la daboolin
- Sida loo helo adeegyada cafimamadka maskaxda
- Sida loo helo dawada iyo adeegyada daawaynta maandooriyaha iyo khamrada.
- Waxa la samaynayo haddii aad hesho biilka
- Sida loo helo caawimada haddii aad ku hadasho luqad aan Ingiriisi ahayn ama haddii aad u baahan tahay inaad hesho wada xidhiidhka qaab kale ku qoran sida maqalka, qaababka korontada la soo geli karo, ama Farta Indhoolaha.
- Sida loo helo xaqiiqooyinka adeeg bixiyayaasha (qandaraasa Molina)
- Sida loo helo takhasuska, caafimaadka maskaxda iyo daryeelka caafimaadka
- Si loo sheegto cabashada
- Sida Molina dib ugu eegto
- teknoolajiga cusub ee Dardaaranka Hore loo sii bixiyo ee daryeelka ee geliyo doorashooyinkaaga daryeelka ee jidhka iyo caafimaadka maskaxda qoraal ahaan ee loogu talo galay qoyskaaga iyo adeeg bixiyahaaga.
- Adeegyada la heli karo si loo maareeyo xaaladaha raaga
- Xuquuqdaada Xubnaha iyo Masuuliyadaha
- Barnaamijka Horumarka tayada Molina
- Dheefahaaga Dawo qorida
- Dheefaha aaga ka baxsan iyo sida loo helo daryeelka
- Sida loo helo diiwaanka adeeg bixiyaha
- Sida loo helo daryeelka koowaad
- Sida loo helo gurmadka, saacada shaqada ka dib iyo daryeelka aaga ka baxsan
- Sida rafcaanka loo qaato go'aanka ku saabsan dheefahaaga
- Sida iyo goorta la gaadhayo xaalada adeegyada maaraynta
- Sida Molina lacag u siiso adeeg bixiyayaasha
- Sida looga warbixiyo khiyaamada daryeelka caafimaadka, khasaaraha ama xad gudubka

Wixii macluumamad dheeraad ah ee ku saabsan dheefahaaga iyo ilaha Molina ay bixiso, fadlan booqoMolinaHealthcare.com.

Waad ku mahad san tahay inaad tahay xubin Molina ah. Waxaanu rajaynaynaa inaan u adeegno baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Si daacad ah,

Qoyskaaga Molina

*Guddida Qaranka ee Hubinta Tayada(NCQA) waxay shaacisay Qiimaynta Qorshaha Heerarka Caafimaadka Sebtambar 15, 2021. The NCQA waa mid madax banaan oo ah 501 ( c )(3) urur aan macaaash doon ahayn oo ka shaqaysa si loo horumariyo tayada daryeelka caafimaadka dhexda maamulka heerarka caddaynta ku salausan, qiyaasaha, barnaamijka iyo aqoonsashada.NCQA Qiimaynta Qorshaha caafimaadku waxa uu qiimeeyaa in ka badan 1,000 gaar ah Medicare iyo Medicaid qorshayaasha caafimaadka saddex aaga oo tayada ah: waayo aragnimada bukaanka, ka hortagga iyo daawaynta.

**Dooro wadamada

***Ilaa $200 sanadle ah qofkiiba wadarta abaal marinta 12 bilood

****Tani waa abaal marin marka lagu daro $200 abaal marinta sanadlaha ah ee igu badan ee loo heli karo xubnaha Apple Health

[Luqadda aan Takoortka lahayn]

MHW PART #1017-2205
MHW-5/3/2022, HCA-5/31/2022 (29900)

28560OTHMDWASO
220519